DALSAN PRIMARY AND SECONDARY SCHOOL

FASALKA: 8aad **TEKNOOLOJI{SU,AALO IYO JAWAABO }** **TAARIIKHDA: ___/02/2021**

Magaca:_____

Cutubka1aad

1. Waa Maxay tamar?

Jwb. Tamartu waa kartida hawl lagu qabto.

2. Immisa ayaa loo qaybiyaa guud ahaan tamarta? Kale sheegne?

Jwb. 2 ayaa loo qaybiyaa. Waxayna kala yihiin

1. Tamarta Gurta (Renewable Energy)

2. Tamarta maaxata ((Non-Renewable Energy)

3. Maxaa ka mid ah ilaha tamarta laga helo?

Jwb. Tamarta Qorraxda, Tamarta Dabaysha, Tamarta Biyaha, Tamarta Shidaalka, Tamarta Danabka(Korontada), Tamarta Kulka, Tamarta Kimikada iyo Tamarta Nukliyeerka.

4. Sheeg isha tamarta ugu weyn dunida?

Jwb. Qorraxda

5. Maxaa ay u baahan tahay hawl kasta oo la qabanayo?

Jwb. Tamar.

6. sidee ayee ku soo baxdaa tamarta qorraxda?

Jwb. Waxa ay ku soo baxdaa hab kul iyo ilays ah.

7. Sheeg waxa ay fududeysay adeegsiga iyo horumarinta teknoolojiyada?

Jwb. Waxa ay fududeysay ka faa'iideysiga tamarta qorraxda.

8. Ilayska qorraxda waxaa loo beddelaa danab(koronto) haddaba sheeg qalabka la adeegsado?

Jwb. Waxa la adeegsadaa qalabka loo yaqaan soolarka (photovoltaic)

9. Qalabka soolarka waxaa loo adeegsadaa in uu danab (koronto) siiyo meelo kala duwan. Haddaba sheeg meelahaas kala duwan?

Jwb. Dayax gacmeedyada, saacadaha, guryaha, dhismayaasha ganacsiga, buuxinta bateriyada iwm.

10. Sheeg sababta loo keydiyo Tamarta qorraxda?

Jwb. Si loo adeegsado marka ay qorraxda dhacdo ama daruuro qariyaan.

11. Sheeg hababka loo keydiyo tamarta ilayska?

Jwb. Hababka loo keydiyo waxaa ka mid ah in lagu keydiyo bateriyo ama marxiyayaal (danab-keydiye) haya tamarta danabka (korontada) si loo adeegsado marka loo baahdo.

12. Sheeg hababka kala duwan oo biyaha looga dhaliyo tamar danab(koronto)?

Jwb. Waxa ka mid ah in la dhiso biyo-xireen lagu xannibo biyaha, ka dibna loo furo marinno ay biyuhu xawaare sare ku Maraan.

13. Waa maxay nooca tamar oo ay adeegsadaan doomaha shiraaca leh?

Jwb. Doomaha shiraaca leh waxa ay adeegsadaan tamarta dabaysha.

14. Waa maxaa nooca tamarta oo ay adeegsadaan doomaha aan shiraaca laheyn iyo maraakiibta?

Jwb. Waxa ay adeegsadaan tamarta shidaalka.

15. Sharax habka biyaha wabiyada looga soo saaro tamar danab(koronto)?

Jwb. Habka biyaha wabiyada looga dhaliyo waxaa ka mid ah in la dhiso biyo-xireen lagu xannibo biyaha, ka dibna loo furo marino ay biyuhu xawaare sare ku maraan.

16. Cilmi Baaris: Qor warbixin ku saabsan mashruucii biyo-xireenkii Faanoole adiga oo ka qoraya:

Meesha laga sameeyey

Sanadaha uu qaatay dhammeystirkiisa Ma

laga FAA'iideystay?

Dawladdee la fulisay mashruucaas dawladdii Soomaaliya.

Jwb. Meesha laga sameeyey inta u dhexeysa Mareereey iyo Jilib.

Sannadihii uu qaatay 1977dii ilaa 1982dii Haa

waa laga faa'iideystay.

Dawladdii la filisay mushruucaas dawaladda Soomaaliya waa dawladda shiinaha.

17. Sidee ayey cimiladu saameyn ugu leedahay tamarta qorraxda?

Jwb. Cimiladu saameyn weyn ayey ku leedahay tamarta qorraxda haddi aysan qorrax jirin lagama faa'iideysan karo ilayska qorraxda.

18. Sidee ayey reer miyigu ugu faa'iideystaan tamarta qorraxda?

Jwb. Waxay uga faaiidaystaan – Qalajinta Maxsuulka beeraha

Iyo in ay beteriyada ku jaajaraystaan

19. Maxay taraan bikaacooyinka iyo muraayadaha marka tamarta qorraxda loo adeegsano in biyo loo beddelo uumi ka dibna danab(koronto).

Jwb. Bikaacooyin iyo Muraayado ayaa lagu aadiyaa Qoraxdda Tamar noqodka ayaa lagu jeediyaa biyo ku jiro dhuumo Biyuhu markey kululaadaan waxa ay uumi wareejiya tarbiinno sabab u noqda dhalinta tamar danab (koronto) ah oo joogto ah,

Cutubka2aad

1. Sidee ayuu fayras ugu gudbi karaa kombiyuutar.

Jwb. Wuxuu ugu gudbi karaa siyaabooyin kala duwan.

1. Inuu Internet-ka kaaga soo gudbo.
2. In falaash fayraska qaba kombiyuutarkaada la galiyo.

2. **Waa maxay dhibaatooyinka uu fayraska u geysto kombiyuutarka?**

Jwb. Inuu wax ka beddelo xogta iyo macluumaadka. Inuu waxyeello u geysto kombiyuutarka.

3. Magacow lid-fayrasyada ugu caansan dunida?

Jwb. McAfee, avast, Symantec, bitdefender, Kaspersky, iyo Norton.

4. Cilmi Baaris: mobaylkaada fayras ma geli karaa? Sidee?

Jwb. Haa wuu geli karaa. In memory ama falaash qaba fayraska la geliyo mobaylkaada. Iyo internet-ka uu kuu soo maro.

5. Samee afgarasho adag oo aan la saadaalin karin.

Jwb. Kursi@%$*814@5@6&garan

6. Shirkadaha, jaamacadaha, iwm waxa ay hayaan xog muhiim ah. Haddii mid ka mid ah lagaaga dhigo sidee u xafidi lahayd xogtaas?

Jwb. 1. In aan kombiyuutarka ku shubo lid-fayrasyada ugu fiican mid ka mid ah.

2 in aan u sameeyo afgarasho adag oo aan la maleegi Karin.

7. Waa maxay habka ugu fiican ee aad ku ilaalin karto xogta kombiyuutarkaaga. haddii aad rabto in aad meel dhaw gaarto ama baahdo?

Jwb. Habka ugu fiican waa inaad dabartid (lock) ama damisid kombiyuutarka.

8. Waa maxay astaamaha lagu yaqaano marka uu fayrus kombiyuutar galore?

Jwb. B. Xawaaraha hawl qabashada kombiyuutarka oo yaradua. T.

Hard disk kombiyuutarka oo waxyeello gaarto.

J. Nidaamka hawlgalka (operating system) oo shaqeyn waaya.

X. Sanduuqyo farriimo ah oo soo noqnoqda ama soo bood booda.

J. Barnaamijyo aadan dalban oo iskood u furma

Cutubka3aad

1. Waa maxay muuqaalka "Backstage"?

Jwb. Waa meesha laga helo keydinta(save), furidda(open), daabicidda(print).

2. Qor magacyada kooxaha hoos yimaada carrabka "Home".

Jwb. Magacyada kooxaha hoos yimaada carrabka Home waxa ka mid ah

1. Font 2. Paragraph 3. Styles 4. Editing

3. Sidee ku heli kartaa fayl dhawaan la furay?

Jwb. Faylashii aad mar dhow furtay waxaad ka heli kartaa liiska "Recent documents". Ka dib Guji file oo dooro Recent.

4. Sidee loo abuuraa dokument cusub?

Jwb. 1. Guji carrabka "File" ka dib waxaa kuu furmaya muuqaalka Backstage.

2. Dooro "New"

3. Dooro "Blank document".

4. Guji "Create". Dokumenti bannaan oo cusub ayaa kuu furmaya

5. Sidee loo furi karaa dokumenti horay u jiray.

Jwb. 1. Guji "file" waxaa kuu furmaya muuqaalka "Backstage".

2. Dooro "open", waxaa kuu soo baxaya muuqaalka(open dialog box)

3. Dooro dokumentiga aad rabto, ka dibna Guji "open"

6. **Qor kooxaha hoos taga carrabka "insert" ?**

Jwb. 1. Pages 2. Tables 3. Illustration 4. Links 5. Header & Footer 6. Text 7. Symbols

7. Waa maxay faa'iidadamastarradda?

Jwb. waxa ay fududeysay cabirka saxda ah ee Dokumentiga

8. Waa maxay Microsoft word 2010?

Jwb. Waa barnaamij qoraal oo fududeeya diyaarinta dokumentiyo kala duwan.

9. Waa maxay "Ribbon"?

Jwb. Waa meesha laga helo dhammaan amarrada muhiimka ah ee loo baahan tahay.

10. Qor carrabyada hoos yimaada "Ribbonka"?

Jwb. Carrabyada waxaa ka mid ah 1. Home 2. Insert 3. Page layout 4. References 5. Mailing 6. Review 7. View

11. Halkee taallaa mastarrada?

Jwb. mastaradda waxa ay taalllaadhinaca kore ee bidixda Dokumentiga.

12. Maxaa loo yaqaanaa faylasha Ms word?

Jwb. Waxaa loo yaqaanaa Dokumentiyo.

Cutubka4aad

1. Maxaa uu fududeyey Ms word?

Jwb. Wuxuu fududeyey in aad tiri karto qoraal kaa khaldamay ama aad badin karto , sidoo kale waxaad rari kartaa qoraal.

2. Muxuu kaa caawin karaa Dokumentiga qaabeysan?

Jwb. Dokumentiga qaabeysan waxa uu kaa caawin karaa in si waafi ah loo fahmo fariintaada.

3. Qor xirfadaha saldhiga u ah Asaasiyaadka Qoraalka?

Jwb. 1. Isdhexgelinta (insert) qoraallada.

2. Doorashada (select) qoraalka.

3. Koobiyeynta (copy) qoraalka

4. Dhejinta (paste) qoraalka

5. Raridda (drag and drop)

6. Tiridda(delete).

4. **Sidee loo tirtiraa qoraal?**

Jwb. 1. Dhig barta qoraalka meesha uu yaal qoraalka aad rabto inaad tirtirto

2. Guji furaha BACqoraalka ee ka tirsan looxa furayaasha si aad u tirto qoraalka bidixda jira.

3. Guji furaha "Delete" si aad u tirto qoraalka middigta xiga.

5. Sidee loo koobiyeeyaa loona dhejiyaa qoraal?

Jwb. 1. Dooro qoraalka aad rabto in aad koobi ka sameyso.

2. Guji astaanta copy ee ku taala carrabka

Home. Waxaad sidoo kale Gujin kartaa midigta hagaha kana dooro copy.

3. Gee barta galinta meesha aad rabto in qoraalka uu ka soo muuqdo.

4. Guji astaanta Paste si qoraalkii aad koobiyeysay ugu dhejiso.

6. **Sidee loo jiidaa Qoraal?**

Jwb. 1. Dooro qoraalka aad rabto in aad jiiddo.

2. Guji hagaha oo u jiid qoraalka meesha aad rabto in ay u muuqato.

7. Sidee loo raadiyaa (find) qoraal?

Jwb. 1. Guji astaanta "Find " oo saaran carrabka Home.

2. Ku qor qoraalka aad rabto inaad ka beddesho Navigation Pane.

3. Haddii qoraalka laga helaayo Dokumentiga, waxaa lagu muujin doonaa midab hurdi(jaalle), wuxuuna ka soo muuqan doonaa Navigation Pane.

8. Sidee loo beddelaa xajmiga farta (font size)?

Jwb. 1. Dooro qoraalka aad rabto inaad wax ka beddesho. Jaale

2. Guji fallaarta ku xigta sanduuqa **"Font size"** oo ku taal carrabka Home

. Taxane tirooyin ah ayaa kuu soo baxaya.

3- tibaxayada cabbirka ee laga rabo farta. Haddii kale waxaad ku qori kartaa aad rabto ka dibna Guji "ENTER".

9. Sidee loo midibeeyaa qoraalka?

Jwb. 1. Dooro qoraalka aad rabto inaad midabeyso.

2. Carrabka Home, Guji fallaarta Text Highlight Color. Liis midabbo ah ayaa soo muuqanaya.

3. Xulo midanka aad rabto.

Cutubka5aad

1. Muxuu kaa caawin karaa kaydinta Dokumentiga?

Jwb. Kaydinta Dokumentiga waxa ay kaa caawinaysaa in uusan baabi'in Dokumentigaaga haddii kombiyuutarku damo ama korontada ka lunto.

2. Maxaan u baahanahay haddii aan rabo in aan la wadaago qof isticmaalaya xirmo hore?

Jwb. Waxaad u baahan doontaa inaad ku kaydiso sida Dokumentiga word 97_2003.

3. Waa maxay faraqa u dhexeeya save iyo save As?

Jwb. Save As waxa ay kuu ogolaaneysaa inaad doorato magaca iyo meesha aad ku keydineysid Dokumentigaaga Halka Save aysan kuu ogolaaneynin inaad doorato magaca iyo meesha aad ku keydineysid, oo iyada kuu dooreyso magaca iyo meesha lagu keydinaayo.

4. Sidee loo sameeya keydin nooc gaar ah **(Save As)?**

Jwb. 1. Guji **"File"** 2. Dooro **"Save As"** 3. Sanduuqa Save As ayaa soo baxaya. Xulo meesha aad rabto inaad ku keydiso Dokumentiga. 4. Waxaad ku qortaa magaca Dokumentiga, ka dibna Guji "Save".

5. Sidee ayaad ugu keydsan kartaa Dokumentigaaga word 97_2003?

Jwb. 1. Guji **"File"** 2. Dooro **Save As**. 3. Ka dooro **"save As type "** word 97_2003 document. 4. Dooro meesha aad rabto inaad ku keydiso Dokumentiga. 5. Waxaad ku qortaa magaca Dokumentiga, ka dibna Guji astaanta Save.

Cutubka6aad

1. Waa maxay faraqa u dhexeeya Landscape iyo portrait?

Jwb. Landscape macnaheedu wuxuu yahay in boggu uu u jeedo si jiifa. Halka portrait loola jeedo si qotonta (ligan).

2. Sidee ayaa loo bedeli karaa jihada Bogga?

Jwb. 1. Dooro carrabka **"Page Layout "**

2. Guji amarka **"Orientation "** ee ka tirsan kooxda setup page.

3. Guji portrait ama Landscape si aad u bedesho jihada bogga.

3. Sidee ayaa loo beddelaa cabbirka bogga (change page size)?

Jwb. 1. Dooro carrabka Page layout.

2. Guji amarka Size. Waxaa kuu soo baxaya qaabab kala duwan,

3. Ka dooro qaabka boggaada.

4. **Sidee ayaa loo beddelaa hareeraha bogga (page margins)?**

Jwb. 1. Dooro carrabka Page Layout

2. Guji astaanta Margins

3. Ka dooro qaabka aad rabtid inoo noqdo boggaaga.

5. **Sidee ayaa loo isticmaalaa Custom Margins?**

Jwb. 1. Dooro page Layout

2. Guji Margins

3. Dooro Custom Margins

4. hagaaji xajmiga dhinacyada bogga, ka dibna Guji OK.